# **Qiimayn:** Maxay u qabataa ilmahaaga?

(Evaluation: What Does It Mean for Your Child? - Somali Version)

## Waa maxay qiimayntu?

Qiimayntu waxa weeyaan habka lagu qiyaaso in ilmhu uu leeyahay dib u dhac ama naafo si loogu diyaariyo waxbarashada gaarka ah iyo waxqabadka kaleba. Waa talaabada u horaysa si ilmaha wax loogu qabto xaga waxbarashada. Waa in qiimayn gaar ahaaneed oo hufan loo sameeyaa ilmaha intii aan loo bilaabin waxbarashada gaar ahaaneed ugu yaraan sadexdii sanoba mar.

Qiimayntu waa in ay ahaataa mid ku lug leh warbixin badan oo ku saabsan xaga fir fircoonida ilmaha, korotaanka, iyo meelaha dareenku ku jiro iyada oo la tix galinayo warbixinta waalidka. Qiimayntu waa mid fiiro gaar ah loo yeelanayo xaga dhaq dhaqaaqa, dabciga, aragtida koritaanka iyo waxyaabaha kale ee la xiriira. Warbixintaas oo dhan waa mid looga dan leeyahay in lagu baadho baahida waxbarshada ee ilmaha.

## Sababta qiimayntu waa maxay?

Qiimaynta waxbarashada gaar ahaaneed wax tarkeedo iyo ula jeedado waa badan tahay:

1. **Aqoonsi.** Waxa ay noqon kartaa aqoonsi lagu garto dib u dhac amaba dhibaato xaga xaga waxbarshada ka haysata ilmaha si wax loogu qabto.
2. **Uqalmid (eligibility).** Waxa ay muujinaysaa in uu ilmuhu yahay naafo sida sharciga yaal dadka naafada ah uu dhigayo (IDEA) in uu u qalmo waxbarashda gaar ahaaneed iyo inkle.
3. **Qorshaynta waxbarshada gaar ahaaneed (IEP).** Waxa aad ka heli kartaa warbixinta aad adiga iyo iskuulkuba aad u baahantihiin si loo qoro IEP.
4. **Tusaalo iyo xeel.** Waxa ay ku tusi karta xeeladaha kala gadisan ee u fiican ilmaha.
5. **Cabiritaanka hor u marka.** Waxa ay saldig u noqon kartaa cabiritaanka waxbarashda ilmahaaga.

Qiimaynta iyo dariiqa loo maro waxa ay saldig u yihiin sidii loo dajin lahaa ku kooban ilmaha. Waa in iskuulku koobiga qoraalada waxbarashda gaar ahaaneed ay u gudbiyaan waalidka si kasta oo ay natiijadu noqotoba. Hadii ay dhacdo in lagu gaba gabeeyo in ilmhu uuna u baahnayn waxbarshada gaar ahaaneed, waa in iskuulku u gudbiyaa waalidka koobi si warbixinta ku jirta loogu isticmaalo siyaabo kale.

## Waxyaabaha lagu cabiro qiimaynta ilmuhu waa maxay?

Hal imtixaan kaliya lama isticmaali karo si loo cabiro in uu ilmuhu leeyahay dib u dhac.Imtixaanada caadiga ah iyo kuwo kaleba waa muhiim in ardayga laga qaado si uu u helo waxabarashada loo baahanyahay.

Imtixaanku waxa uu cabiraa kartida iyo heerka uu ilmuhu taaganyahay iyada oo natiijada lagu qiyaaso su'aalo kala gadisan oo ujeedo leh. Imtixaanka caadiga ah waxa uu kuu muujin karaa sida ardaygu uu ku yahay iskuulka. Meelaha kale ee laga qiyaasi karo waxa ka mid ah, warbixinta laga helo waalidka, dad aqoon u leh ilmaha oo laga wada hadlo xaga koritaanka iyo aragtida. Qiimayntu waa muhiim, laakiin qiimanta warbixin badan ayaa ku jira:

- warbixin xaga daawooyinka
- hor u marka ilmaha oo lagu qiaaso d'adiisa
- fiiro loo yeesho ilmaha iskuu;lka iyo gurigaba
- warbixin laga helo waalidka iyo macalimmint

© 2000 PACER Center, Inc. | ACTion Sheet: PHP-c2so
8161 Normandale Blvd. Minneapolis, MN 55437 | Phone (952) 838-9000 | MN Toll-Free (800) 537-2237
PACER@PACER.org | PACER.org

Waalid ahaan, adiga ayaa warbixin badan oo ah xaga dabciga iyo waxyaabaha uu ilmuhu u baahanyahay laga heli karaa. Marka la isku daro wixii warbixin ah ee kasoo baxday imtixaanka iyo qiimaynta ka dib ayaa go'aan laga gaadhi karaa waxbarshada ilmuhu u baahanyahay.

## Imtixaanada qaarkood maxaa ka mid ah?

Waxa jira imtixaano badan oo kala gadisan oo ay iskuuladu isticmaalaan si ay u qiyaasaan hor u marka ardayga. Waxana ka mid ah kuwa hoos ku qoran:

### Imtixaanka kooxeed

Imtixaanka kooxeed ma noqon karo mid lagu qiyaaso in ilmuhu u baahanyahay wax u qabad gaar ahaaneed. Waxa imtixaanka noocaa ehi muujin karaa sida ardaygu uu wax u bartay mraka la isku qiyaaso aradyda da'diisa ah, mase aha mid gaar ahaan inoo muujin karta waxbarshada iyo kartida ilmaha.

### Imtixaanka shaqsiyeed

Imtixaanka laga qaado ardayga kalidii ayaa inoo muujin kara in uu ilmuhu u baahanyahay in wax u qabad dheerad ah loo baahanyahay iyo inkale si uu ardaygu hor u mar uga gaadho xaga iskuulka.

### Qiimaynta ku dabaqan manhajka (CBAs) ama Qiimaynta ku dabaqan qiyaasta (CBMAs)

Imtixaanka noocaa ah waxa diyaariya iskuulada si loo baadho heerka waxabarshada ilmaha ee la xiriirta waxyaabaha loogu dhigo glaaska. Waxa ay noqon karaan hab fiican oo waalidka iyo macalimiintuba ku ogaan karaan in uu ilmuhu waxbaranyo iyo inkale, laakiin looma isticmaali karo in lagu qiyaaso in uu ilmuhu u baahanyahay waxqabad gaar ahaaneed.

### Imtixaanka guud

Imtixaanka guud waa mid ay diyaariyaan dad khbrada u leh lagana qaado arday tiro badan. Imtixaanka nooca ehi waa mid lagu maamulo hab qiyaas leh. Waxana lagu qiyaasi karaa ilmaha waxbarahadiisa iyo waxa uu baran karo.

### Imtixaanka la isku miizaamo

Waa imtixaan guud oo loo eego ardaygu in uu la mid yahay ardayda kale. Waxa lagu ogaan karaa heerka uu ilmuhu taagan yahay marka lagu qiyaaso ilmaha la da'a ah iyo kuwa ay isku fasalka yihiinba.

### Criterion-referenced tests

Imtixaanka noocaa ehi waa mid lagu qiyaaso waxa ilmuhu uu qaban karo iyo khibrada uu bartay. Imtixaankaasina ma aha mid qiyaasi kara aradaygu heerka uu taaganyahay marka loo eego ardayda kale. Waxase lagu ogaan karaa hor u marka ilmaha marka la eego heerka uu taagnaa markii hore iyo hada.

## Maxay yihiin waxyaabaha u sal ah imtixaanada?

Waa in ay iskuuladu ay tix galiyaan waxyaabo badan oo ku saabsan imtixaanka si loo qiimeeyo ilmaha. Waxana ka mid ah kuwa hoos ku qoran:

- Waa in imtixaanku noqon karo mid lagu kalsoon yahay. Imtixaanku waxa uu noqon karaa mid lagu kalsoon yahay hadii natiijadu ay noqoto mid joogto (consistent) marka imtixaanka la qaado wakhtiyo kala gadisan iyo dad kala gadisanba. Waa in aad waydiin karto in imtixaanku uu yahay mid lagu kalsoonyahay iyo inkale.
- Waa in uu imtixaanku noqdaa mid macquul ah. imtixaanku waxa uu noqon karaa mid macquul ah hadii wixii loogu talagalay in lagu qiyaaso ay sidii la rabay u dhaco. Waa in imtixaanku uu noqdaa mid kartida iyo aqoonta ilmaha lagu qiyaasi karo. Imtixaan walba oo ah mid guud waa in uu noqdo mid macquul ah si natiijadu ay u noqoto tii la rabay.

- Imtixaanka iyo qiimayntu waa in ayna noqon mid ay midib takoor ku jiro. Waa in la isku dayaa sidii imtixaanku u ahaan lahaa mid luqada ilmaha ku qoran.
- Waxyaabaha qaarkood oo ay ka mid yihiin foojigaanta, walaaca, iyo fahamka imtixaanka ayaa wax u dhimi karaa natiijada.

## Waa maxay qiimaynta wax qabadku?

Iyada oo ay dhici karto in imtixaanku uu yahay hab ilmaha lagu qiimayn karo, hadana ma noqon karto natiijado mid kartida ilmaha muujisa. Qiimayunta wax qabadku waxa aan ku garan kanaa sida ilmuhu u dhaqmo guriga, iskuulka iyo jaarka.

Qiimynta wax qabadku waxa ay muujisaa, akhriska,qoraalka, iyo khibrada uu u leeyahay xisaabta.

Waxa kale oo ay muujisaa sida ilmuhu u labisan karo, sida uu buska u raaco, iyo sida lacagta loo isticmaalo.

## Waa maxay qiimaynta dabciga?

Marka ilmuhu uu muujiyu dhibaato xaga dabciga ah, waxa laga samayn karaa qiimayn ah xaga dabciga si looga hor tago.

Qiimaynta dabciga waxa ka mid ah waxyaabaha hoos ku qoran:

- Faah faahin cad oo ku saabsan dhibaatada dabciyeed.
- U fiirsasho gaar ah oo loo yeesho ilmaha saacado kala gadisan guriga iyo meelo kaleba. Waxyaabaha loo fiirsanayo waxa ka mid ah (1) maxaaa ka dhacay goobta inta dabcigu isbadalin ka hor (2) muxuu ahaa dhaqankii u horeeyay, iyo (3) maxaa ardaygu uu helay ama ku guulaystay dhaqankaa ka bacdi.
- Ka hortaga dabciga ee natiijada fiican leh, xeeladaha, iyo caawimaad badan oo ku lug leh wax ka qabadka dhaqanka si loogu tababaro.

Marka la gabagabeeyo qiimaynta dabeecadeed, ayaa waxa loo dajiyaa ilmaha qorsho ah ka hor taga dabeecada looguna qoraa qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed.

## Waa maxay habka loo isticmaalo natiijada qiimaynta?

Marka la dhamays tiro qiimaynta lagu sameeyay ilmahaaga, ayaa waxa aad la kulmi doontaa kox khibrad u leh si aad ugala hadasho in ilmuhu u qalmo waxbarashada gaar ahaaneed marka loo eego sharciga IDEA. Waa in uu iskuulku ku siiyaa koobi ah qiimaynta iyo qoraal ku saabsan in uu ilmuhu u qalmo iyo in kale.

Hadii ay kooxdu go'aamiso in uu ilmahaagu u qalmo, talaabada ku xigtaa waa in loo diyaariyo IEP (waxbarshada gaar ahaaneed).

Ulajeedada IEP ee ay kooxdu dajiyaan waa in uu noqdaa mid toos ugu lug leh baahida iyo wax qabadka ilmaha. Waa muhiim in ay waalidku isku dayaan in ay fahmaan qiimaynta oo ay ka codsadaan in qof khibrad u lehi ka dhaadhiciyo inta aan la qorin IEP.

Waa in ay waalidku ka baaraan dagaan qoraalka ay qoriin kooxdu iyaga oo isku qiyaasaya waxa ay iyagu aaminsanyihiin iyo waxa ilmha laga qoray in ay isku mid yihiin.

## Goorma ayaa ardayga qiimayn labaad lagu samayn karaaa?

Ardayda ku jirta wxabarashada gaar ahaaneed waa in qiimayn labaad lagu sameeyaa hadii macalinku ama waalidku ay codsadaan sadexdii sanoba mar. waxa ka oo baxana waa in lagu qiyaasaa hor u marka ardayga sida ku qoran IEP, waxa kale oo lagu qiyaasi karaa in uu ilmuha loo sii wado waxbarashada iyo inklae.

Qiimaynta labaad waxa ay ka koobnaan kartaa warbixintii hore, warbixinta waalidka, aragtida macalinka galaaska, iyo waxayaabaha kale ee lago qoro ilmaha kuna dabaqsan IDEA.

Marakaa ka bacdi ayay kooxda IEP go'aamin karaan in uu ilmuhu wali usii baahanyahay waxabarashada gaar ahaaneed iyo inkale. Hadii ay kooxda IEP go'aamiyaan in aan warbixin kale loo baahnayn, waa in ay waalidka qoraal ku war galiyaan.

## Waa maxay su'aalaha loo bahanyahay in aan waydiiyo marka ilmaha lagu samaynayo qiimayn amaba qiimayn labaad?

1. Waa maxay imtixaanka lagu qiimanayo ilmahayga? Waayo? Sidee ayaa warbixinta loogu isticmaali doonaa?
2. Ma dhici kartaa in qofka qiimaynayaa uu u yeesho ilmaha fiiro gaar ah ama uu la hadlo macalinka?
3. Qofka qiimaynaya ilmahaygu khibrad ma u leeyahay mase qiimeeyay arady la mid ilmahayga?
4. Ma dhici kartaa in dib u dhaca ilmahaygu ay wax u dhinto natiijada imtixaanka?
5. Ilmahaygu hadii uu u baahado qof u turjubaana ma heli karaa? Waa in ilmha lagu imtixaana afka uu u dhashay.
6. Ilmahaygu la mid ma yahay kooxda imtixaanka loo diyaariyay? Qofka imtixaanka masuulka ka ahi ma yahay qof aqoon u leh dhaqanka?
7. Ma dhici kartaa in natiijada kasoo baxda imtixaanku ay noqota mid lagu qimmeyo glaaska ilmuhu dhigan karo iyo da'diisaba? Sideebaase loogu isticmaali kara qimaynta?
8. Waa maxay warbixinta la iiga baahanyahay in aan ka bixiyo ilmahayga?
9. Waa maxay waxa loo qaban karo ilmaha si uu ula qabsado goobta imtixaanka lagaga qaadayo.

## Maxaa dhici kara hadii aan ku raacsanayn natiijada qiimaynt ee iskuulka?

Hadii ay dhacdo in aad ku raacsanayn natiijada qiimaynta, waxa aad codsan kartaa mid ka madax banana (IEE) oo aan alacag kaaga bixin. Waxa sameeya IEE shaqsiyaad ka madax banana iskuulka oo khibrad u leh. Wasaarada waxbarshada ee dagmadu waa in ay siiyaan waalidka magaacda dadka bixiya imtixaanka oo ay bixiyaan kharashka.

Hadii iskuulku diido codsiga IEE, waxa degmadu qorshayn karaan kulan ah in labada dhinacba la isku dagaysto. Marka iskuulku ay samaynayaan IEE, waa in ay qiimayntu noqota mid la mid ah ta iskuulka lagu isticmaalo waana in ay tix galiyaan waxa ka soo baxa.

Hadii ay dhacdo in waalidka tiisa loo raaco, waxa xaq waalidku u leeyhiin in ilmaha lagu sameeyo IEE lacgtana waalidku bixiyaan.

Marka la gabagabiiyo qiimaynta IEE waxa aad codsan kartaa warbixin qoraal ah. Waxa aanad isku da'ydaa in wixii ka soo baxaa oo dhan qoraal lagu qoro laguna siiyo koobi. marka aad hesho koobiga warbixinta, la hadal iskuulka si aad kulan ula yeelato ku saabsan diyaarinta IEP.